# *OGAYSIISKA DHAQAMADA ASTURNAANTA SIRTA*

OGAYSIISKAN WAXA UU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA BIXIN KARO IYO SIDA AAD U HELI KARTID MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADDAR LEH DIB UGU EEG.

**Taariikhda Dhaqangalka Ogeysiiska:** Febraayo 16, 2026

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka & Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta waxa looga baahan yahay sharcigu inuu qaado tillaabooyin macquul ah si loo hubiyo asturnaanta xogtaada caafimaadka ee shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo iyo inuu kuu sheego wax ku saabsan:

- Isticmaalka Qorshaha iyo bixinta Macluumaadka Caafimaadka Dhawrsan (“PHI”);
- xuquuqdaada asturnaanta ee la xiriirta xogtaada PHI;
- waajibaadyada Qorshaha ee la xiriira xogtaada PHI;
- xaqa aad u leedahay in aad cabasho u gudbiso Qorshaha iyo Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka; iyo
- qofka ama xafiiska lagala xiriiro macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhaqamada asturnaanta xogta ee Qorshaha.

Ereyga "Macluumaadka Caafimaadka Dhawrsan" (PHI) waxaa ku jira dhammaan macluumaadka caafimaad ee shaqsi ahaan loo aqoonsan karo ee uu gudbiyo ama uu ilaaliyo Qorshaha, iyadoon loo eegin qaabka (af, qoraal, elektaroonig ahaan.) waxaana ku jira “macluumaadka hidde-sidaha.”

## QAYBTA 1

### OGAYSIISKA ISTICMAALKA XOGTA PHI IYO BIXINADA XOGTA

Marka aad codsato, Qorshaha waxaa looga baahan yahay inuu ku siiyo marin-u-helka xogta PHI gaar ah si aad u baarto oo aad u nuqul uga qaadato.
Isticmaalka iyo bixinta xogtaada PHI waxaa laga yaabaa in Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha uu u baahdo si uu u baaro ama u ogaado u hoggaansanaanta Qorshaha ee xeerarka asturnaanta.

***Isticmaalka iyo bixinta si loo sameeyo daaweyn, lacag-bixin iyo hawlaha daryeelka caafimaadka***

Qorshaha iyo la-hawlgalayaashiisa ganacsi waxay isticmaali doonaan xogta PHI iyaga oo aan haysan oggolaansho ama fursad aad ku oggolaato ama ku diiddo samaynta daaweyn, lacag-bixin iyo hawlaha daryeelka caafimaadka. Marka sharcigu u baahdo, waxaan bixinta ku xaddidi doonnaa Qaybta Xogta oo Kooban, ama haddii loo baahdo, macluumaadka ugu yar ee lagama maarmaanka ah si loo gaaro ujeedada loogu talagalay. Qorshaha iyo la-hawlgalayaashiisa ganacsi (iyo caymis-bixiyeyaal kasta oo bixinaya dheefaha ka qaybgalayaasha Qorshaha) waxay sidoo kale siin karaan Guddiga Ammaanada ee Qorshaha waxyaabaha soo socda: (1) Xogta PHI ujeeddooyin la xiriira maamulka Qorshaha (lacag bixinta iyo hawlgallada daryeelka caafimaadka); (2) soo koobidda macluumaadka caafimaadka oo loogu talagalay ujeeddooyinka caafimaadka ama joojinta khasaaraha caymiska ama ujeeddooyinka wax ka beddelka Qorshaha; iyo (3) macluumaadka diiwaangelinta (in qofku u qalmo dheefaha hoos yimaada Qorshaha). Guddiga Ammaanada ayaa wax ka beddelay Qorshaha si ay u ilaaliyaan xogtaada PHI sida uu farayo sharciga federaalku.

***Daawayntu*** waa bixinta, isku-dubbaridka ama maaraynta daryeelka caafimaadka iyo adeegyada la xiriira. Waxaa sidoo kale ka mid ah balse aanay ku koobnayn la-talinta iyo u kala gudbinta u dhexeeya mid ama in ka badan oo bixiyayaashaada ah.

Tusaale ahaan, Qorshuhu wuxuu u sheegi karaa dhakhtarka ku daweynaya magaca dhakhtarkaaga raajada si dhakhtarku uu dhakhtarkaaga raajada u weydiiyo raajooyinkaaga.

***Lacag bixintu*** waxaa ka mid ah balse aanay ku koobnayn tallaabooyinka lagu gaarayo go'aannada daboolista caymiska iyo lacag bixinta (oo ay ku jiraan biilasha, maaraynta sheegashooyinka, beddelista, magdhowga qorshaha, dib-u-eegista baahi caafimaad darteed iyo ku habboonaanta daryeelka iyo dib u eegista ka faa’iidaysiga iyo oggolaanshaha hore.)

Tusaale ahaan, Qorshuhu wuxuu dhakhtar u sheegi karaa inaad u qalanto daboolista caymiska ama boqolkiiba inta uu bixin doono Qorshuhu.

***Hawlgallada daryeelka caafimaad*** waxaa ka mid ah balse aanay ku koobnayn qiimeynta tayada iyo horumarinta, dib-u-eegista kartida ama aqoonta xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, dammaanad qaadka, qiimeynta caymiska iyo hawlo kale oo caymis ah oo la xiriira abuurista ama cusboonaysiinta qandaraasyada caymiska. Bixinta xogta PHI oo ah macluumaad hidde-side ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka qiimaynta caymiska waa mamnuuc. Waxaa kale oo ku jira maaraynta cudurrada, maaraynta kiisaska, sameynta ama diyaarinta dib-u-eegista caafimaadka, adeegyada sharciga iyo hawlaha hubinta oo ay ku jiraan barnaamijyada u hoggaansanaanta wax isdaba marinta iyo xadgudubka, qorsheynta ganacsiga iyo horumarinta, maaraynta ganacsiga iyo hawlaha guud ee maamulka.

Tusaale ahaan, Qorshuhu wuxuu isticmaali karaa macluumaadka ku saabsan sheegashooyinkaaga si uu kuugu gudbiyo barnaamijka maaraynta cudurrada ama uu u hubiyo saxnaanta hawlihiisa farsamaynta sheegashooyinka.

### *Adeegsiga iyo bixinta u baahan oggolaanshahaaga qoran*

Oggolaanshahaaga qoran guud ahaan waa la heli doonaa ka hor inta uusan Qorshuhu adeegsan ama bixin qoraallada daaweynta dhimirka ee adiga kugu saabsan ee ka imanaya baxnaaniyahaaga cilmi-nafsiga. Qoraallada daaweynta cilmi-nafsiga waa qoraallo si gaar ah loogu fayl-gareeyo oo ku saabsan wadahadallada aad la yeelato xirfadlahaaga caafimaadka dhimirka inta lagu jiro kulanka la-talinta. Kuma jiraan macluumaad kooban oo ku saabsan daaweyntaada caafimaadka dhimirka. Qorshuhu wuxuu isticmaali karaa oo bixin karaa qoraalladaas marka uu ugu baahdo Qorshuhu inuu ku difaaco dacwadaha aad gudbisay.

### *Adeegsiga iyo bixinta u baahan in lagu siiyo fursad aad ku oggolaato ama aad ku diido ka hor adeegsiga ama sii deynta*

Bixinta xogtaada PHI oo la siiyo xubnaha qoyska, qaraabada kale iyo asxaabtaada gaarka ah ee kuu dhow waa la oggol yahay haddii:

- macluumaadku uu si toos ah ula xiriiro ka qaybgalka qoyska ama saaxiibka ee daryeelkaaga ama lacag-bixinta daryeelkaas; iyo
- middood aad oggolaatay bixinta ama lagu siiyay fursad aad ku diiddo oo aadan diidin.

*Qawaaniin dheeraad ah iyo waxyaabo ka reeban ayaa khuseeya xubnaha qoyska. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka codsan kartaa Qorshaha.*

### *Adeegsiga iyo bixinta aan loo baahnayn ogolaanshaha, ama fursadda lagu diidayo*

Adeegsiga iyo bixinta xogtaada PHI waa la oggol yahay iyada oo aan la helin ogolaanshahaaga, fasaxaaga ama codsigaaga marka lagu jiro xaaladaha soo socda:

1. Daaweynta, lacag-bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka.
2. Macluumaadka diiwaangelinta waxaa la siin karaa Guddiga Ammaanada
3. Soo koobidda macluumaadka waxaa la siin karaa Guddiga Ammaanada si loogu isticmaalo ujeeddooyinka kor ku xusan.
4. La-taliyayaasha Qorsheynta ee adeegyada siiya Qorshaha, oo ay ku jiraan balse aanay ku koobnayn, habaynta diiwaangelinta, hagitaanka biilasha iyo lacagaha iyo gelinta xogta.
5. Marka sharcigu u baahdo.
6. Marka loo ogolaado ujeeddooyin ama hawlo caafimaad dadweyne, oo ay ku jiraan marka loo baahdo in la soo sheego cilladaha badeecada, si loogu oggolaado in badeecada dib loo soo celiyo. Xogtaada PHI waxaa sidoo kale la bixin karaa haddii aad la kulantay cudur faafa ama aad halis ugu jirto inaad faafiso cudur ama xaalad, haddii sharcigu u baahdo.
7. Marka sharcigu farayo inaad macluumaadka ku saabsan xadgudubka, dayacaadda ama rabshadaha qoyska u gudbiso hay'adaha dawladda haddii ay jirto aaminsanaan macquul ah oo ah inaad dhibbane u tahay xadgudub, dayac ama xadgudubka lammaanaha. Xaaladdan oo kale, Qorshuhu wuxuu si degdeg ah kuugu sheegi doonaa in bixintaas la sameeyay ama la sameyn doono haddii ogeysiiskaas uu keenayo khatar waxyeello halis ah. Ujeedada soo sheegista xadgudubka ama dayaca carruurta, looma baahna in la ogeysiiyo qofka aan qaan gaarin in bixintaas la sameeyay ama la sameyn doono. Bixinta guud ahaan waxaa loo gudbin karaa waalidiinta ilmaha yar ama wakiillada kale inkastoo ay jiri karaan duruufo hoos yimaada sharciga federaalka ama gobolka marka waalidiinta ama wakiillada kale aan la siin karin fursad ay ku helaan xogta PHI ee ilmaha yar.
8. Hay'ad kormeer caafimaad oo dadweyne oo loogu talagalay hawlaha kormeerka ee sharcigu oggol yahay. Tani waxaa ka mid ah ku adeegsiga ama ku bixinta baaritaanka madaniga ah, maamulka ama dambiyada; kormeerka; tallaabooyinka shati-bixinta ama edbinta (tusaale ahaan, si loo baaro cabashooyinka ka dhanka ah bixiyeyaasha); iyo hawlaha kale ee lagama maarmaanka u ah kormeerka habboon ee barnaamijyada dheefaha dowladda (tusaale ahaan, si loo baaro wax isdaba-marinta Medicare ama Medicaid.)
9. Marka loogu baahdo dacwadaha garsoorka ama maamulka. Tusaale ahaan, xogtaada PHI waxaa laga yaabaa in la bixiyo iyadoo laga jawaabayo codsi maxkamadeed ama ogaansho ah iyadoo la raacayo shuruudo gaar ah. Hal mid oo ah shuruudahaas ayaa ah in Qorshaha la siiyo dammaanado ku qanciya Qorshaha in dhinaca codsanaya uu sameeyay isku day niyad wanaag ah si uu kuu siiyo ogeysiis qoraal ah, ogeysiiskuna uu bixiyay macluumaad ku filan oo ku saabsan dacwadda si ay kuugu saamaxdo inaad soo bandhigto diidmo oo aan wax diidmo ah laga keenin ama lagu xalliyay dhinac u janjeera bixinta xogta oo ay samaysay maxkamad.
10. Marka loogu baahdo ujeeddooyin sharci fulineed, oo ay ku jiraan ujeeddada aqoonsashada ama helitaanka tuhmane, baxsad, markhaati muhiim ah ama qof maqan. Sidoo kale, marka la bixinayo macluumaadka ku saabsan qof loo haysto ama looga shakisan yahay inuu yahay dhibane dambi laakiin kaliya haddii qofka loo haysto ama looga shakisan yahay inuu yahay dhibane dambi laakiin kaliya haddii qofku ogolaado bixinta ama Qorshuhu uusan awoodin inuu helo heshiiska qofka sababo la xiriira xaalado degdeg ah. Intaa waxaa dheer, sarkaalka fulinta sharciga waa inuu matalaa in macluumaadka aan looga gol lahayn in loo isticmaalo si kadhan ah qofka, dhaqdhaqaaqa degdegga ah ee fulinta sharciga waxaa saameyn weyn iyo mid xun ku yeelan doona sugitaanka helitaanka heshiiska qofka iyadoona bixinta ku jirtaa danta ugu fiican ee qofka sida lagu go'aamiyo adeegsiga xukminta ugu wanaagsan ee Qorshaha.
11. Marka loo baahdo in la siiyo baaraha dhimashada ama baaraha caafimaadka si loo aqoonsado qof dhintay, loo go'aamiyo sababta dhimashada ama waajibaadka kale ee sharcigu oggol yahay. Sidoo kale, shaacinta waxaa loo ogol yahay agaasimayaasha aaska, iyadoo la raacayo sharciga khuseeya, sidi loogu baahdo inay u gutaan waajibaadkooda ku aaddan qofka dhintay.
12. Cilmi-baaris caafimaad taasoo ku xiran shuruudo.
13. Marka ay waafaqsan tahay sharciga khuseeya iyo heerarka anshaxa haddii Qorshuhu, si niyad wanaagsan u aaminsan yahay in adeegsiga ama bixinta ay lagama maarmaan u tahay ka hortagga ama yaraynta khatar halis ah oo soo socota oo ku soo fool leh

caafimaadka ama badbaadada qofka ama dadweynaha, xogtana la siinayo qof si macquul ah u awoodo inuu ka hortago ama yareeyo khatarta, oo ay ku jirto bartilmaameedka khatarta.

14. Marka uu oggolaado iyo inta lagama maarmaanka u ah in la raaco magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada kale ee la midka ah ee sharcigu dejiyay.

### *Adeegsiga iyo Bixinta Diiwaanada Daaweynta Xanuunka Laga Qaado Isticmaalka Maandooriyaha*

Qorshuhu wuxuu heli karaa, hayn karaa, ama bixin karaa diiwaannada kuu aqoonsanaya inaad qabto cillad isticmaalka maandooriyaha laga qaado, lagugu ogaaday cillad isticmaalka maandooriyaha laga qaado, ama aad qaadanayso daaweyn cillad isticmaalka maandooriyaha laga qaado oo ka timid barnaamij federaal ah oo lagu caawiyo cilladaha laga qaado isticmaalka maandooriyaha. Diiwaanadan waxaa ilaaliya sharciga federaalka waxayna helaan ilaalin sir ah oo ka weyn macluumaadka kale ee caafimaadka, si waafaqsan 42 C.F.R. Qaybta 2 ("Qaybta 2").

Qorshuhu ma isticmaali doono ama ma bixin doono diiwaannada daaweynta cillada laga qaado isticmaalka maandooriyaha ilaa:

- Aad ka bixiso oggolaansho qoraal ah oo aad buuxiso shuruudaha Qaybta 2;
- Adeegsiga ama bixinta xogta ay u baahan tahay ama oggolaato Qaybta 2 (tusaale ahaan, xaalad degdeg ah oo caafimaad, cilmi-baaris cilmiyeed, hawlo hubin ama qiimeyn ah, si loo soo sheego dambiyada qaarkood ee ka dhaca goobaha barnaamijka, ama iyadoo la raacayo amar maxkamadeed oo ansax ah); ama
- Macluumaadka si buuxda waxyaabaha la isku aqoonsanayo looga saaray iyadoo la raacayo Qaybta 2.

Diiwaanada Qaybta 2 (ama marag-furka ku saabsan waxyaabaha ku jira) looma isticmaali karo ama laguma bixin karo wax ah dacwad madani ah, dambi, maamul, ama sharci-dejin ah oo adiga kaa dhan ah marka laga reebo in lagu saleeyo oggolaanshahaaga gaarka ah ee qoran ama iyadoo la raacayo amar maxkamadeed oo u hoggaansan Qaybta 2.

Diiwaan kasta oo ah daaweynta cillada laga qaado isticmaalka maandooriyaha oo uu sii bixiyo Qorshuhu wuxuu ku sii bixinayaa oggolaanshahaaga qoran wuxuu ku xirnaan doonaa xannibaadaha sii bixinta xogta ee federaalka. Qofka helaya macluumaadka waa laga mamnuucay inuu sii bixiyo ilaa in lagu oggaaladay Qaybta 2 mooyee ama aad qoraal ahaan u oggolaato adiga.

Qorshuhu wuxuu ilaalin doonaa ilaalin ku habboon si loo ilaaliyo sirta diiwaannada cillada laga qaado isticmaalka maandooriyaha, oo ay ku jiraan wax kasta oo ah kala soocid, calaamadayn, xayiraadaha marin-u-helka, ama xaddidaadyo dib-usii-bixinta xogta oo ay u baahan tahay Qaybta 2.

Marka laga reebo sida ku cad ogeysiiskan, adeegsiga iyo bixinta xogta waxaa lagu sameyn doonaa oo keliya oggolaanshahaaga qoran, iyadoo ku xiran xaqa aad u leedahay inaad ka noqoto oggolaanshahaas.

## QAYBTA 2

### XUQUUQDA SHAQSIYAADKA

### *Xaqa aad u leedahay inaad codsato Xaddidaad ku saabsan Adeegsiga iyo Bixinta Xogta PHI*

Waxaad codsan kartaa Qorshaha inuu xaddido adeegsiga iyo bixinta xogtaada PHI; si kastaba ha ahaatee, Qorshaha kuma qasbana inuu aqbalo codsigaaga. Qorshuhu waa inuu u hoggaansamaa codsigaaga inuu xaddido bixinta macluumaadkaaga qarsoodiga ah xagga ujeeddooyinka lacag bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka haddii aad si buuxda u bixisay adeegyadan, oo jeebkaaga ah.

Qorshuhu wuxuu qaabili doonaa codsiyada macquulka ah si farriimaha xogta PHI loogu helo habab kale ama goobo kale.

Adiga ama wakiilkaaga shaqsiyeed waxaa lagaaga baahan doonaa inaad buuxisaan foom si aad u codsataan xaddidaadyo ku saabsan adeegsiyada iyo bixinta xogtaada PHI.

Codsiyada noocaas ah waa in sarkaalka asturnaanta sirta loogu gudbiyaa:

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, Minnesota, 55425
Taleefan (952) 854-0795 ama Lambarka Wicitaanka Bilaashka ah (800) 535-6373

### *Xuquuqda Fiirinta iyo Koobi Ka Qaadashada Xogta PHI*

Waxaad xaq u leedahay inaad baarto oo aad hesho nuqul ka mid ah xogtaada PHI oo ku jirta "qaybta diiwaanka loo qoondeeyay," ilaa inta Qorshuhu uu ilaalinayo xogta PHI. Haddii Qorshuhu uu isticmaalo ama xogtaada PHI uu ku hayo diiwaanka caafimaadka elektaroonigga ah, waxaad xaq u leedahay inaad nuqul ka mid ah macluumaadkan ku hesho qaab elektaroonig ah.

"Qaybta Diiwaanka Loo Qoondeeyay" waxaa ka mid ah diiwaannada caafimaadka iyo diiwaannada biilasha ee ku saabsan shakhsiyaadka uu hayo ama u hayo daryeel bixiye caafimaad oo la daboolo; diiwaangelinta, lacag bixinta, biilasha, xukunka dacwadaha iyo nidaamyada diiwaanka maareynta kiiska ama caafimaadka ee uu hayo ama u hayo qorshe caafimaad; ama macluumaad kale oo loo isticmaalo guud ahaan ama qayb ahaan ay u isticmasho ama wakiil uga tahay hay'ad la daboolay si ay go'aanno uga gaarto shakhsiyaadka. Macluumaadka loo isticmaalo koontaroolka tayada ama falanqaynta dib u eegista asxaabta oo aan loo isticmaalin in lagu gaaro go'aanno ku saabsan shakhsiyaadka kuma jiraan qaybta diiwaanka loo qoondeeyay.

Macluumaadka la codsaday waxaa la bixin doonaa 30 maalmood gudahood haddii macluumaadka lagu hayo goobta ama 60 maalmood gudahood haddii macluumaadka lagu hayo meel ka baxsan goobta. Muddo kordhin 30 maalmood ah oo halmar ah ayaa loo oggol yahay haddii Qorshuhu uusan u hoggaansami karin waqtiga kama dambaysta ah.

Adiga ama wakiilkaaga shaqsiyeed waxaa lagaaga baahan doonaa inaad buuxisaan foom si aad u codsataan helitaanka xogta PHI ee ku jirta qaybtaada diiwaanka loo qoondeeyay. Codsiyada helitaanka xogta PHI waa in loo gudbiyaa sarkaalka asturnaanta sirta:

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, Minnesota, 55425
Taleefan (952) 854-0795 ama Lambarka Wicitaanka Bilaashka ah (800) 535-6373

Haddii la diido helitaanka, adiga ama wakiilkaaga shaqsiyeed waxaa la siin doonaa diidmo qoraal ah oo qeexaysa waxa loo cuskaday diidmada, sharraxaad ku saabsan sida aad u adeegsan karto xuquuqda dib u eegistaas iyo sharraxaad ku saabsan sida aad ugu caban karto Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka.

### *Xaqa Wax ka Beddelidda Xogta PHI*

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato Qorshaha inuu wax ka beddelo xogtaada PHI ama diiwaankaaga kugu saabsan ee ku jira qaybta diiwaanka loo qoondeeyay ilaa inta xogta PHI lagu hayo qaybta diiwaanka loo qoondeeyay.

Qorshuhu wuxuu haystaa 60 maalmood ka dib marka codsiga la sameeyo si uu wax uga qabto codsiga. Muddo kordhin 30 maalmood ah oo halmar ah ayaa loo oggol yahay haddii Qorshuhu uusan u hoggaansami karin waqtiga kama dambaysta ah. Haddii codsiga la diido gebi ahaan ama qayb ahaan, Qorshuhu waa inuu ku siiyaa diidmo qoraal ah oo sharraxaysa sababta diidmada. Adiga ama wakiilkaaga shaqsiyeed waxaad markaa soo gudbin kartaan bayaan qoraal ah oo aynaan ku raacsanayn diidmada oo bayaankaas lagu daro bixin kasta oo mustaqbalka ah oo ku aadan xogtaada PHI.

Codsiyada wax ka beddelka xogta PHI ee ku jira qaybta diiwaanka loo qoondeeyay waa in sarkaalka asturnaanta loogu gudbiyaa:

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, Minnesota, 55425
Taleefan (952) 854-0795 ama Lambarka Wicitaanka Bilaashka ah (800) 535-6373

Adiga ama wakiilkaaga shaqsiyeed waxaa laga baahan doonaa inaad buuxisaan foom si aad u codsataan wax ka beddelka xogta PHI ee ku jirta qaybtaada diiwaanka loo qoondeeyay.

*Xaqa Aad u Leedahay Inaad Hesho Diiwaanka Bixinada Xogta PHI*

Marka aad codsato, Qorshuhu wuxuu sidoo kale ku siin doonaa diiwaanka bixinada ee uu sameeyay Qorshaha ee ku aadan xogtaada PHI inti lagu jiray lixdii sano ee ka horreysay taariikhda codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee, diiwaanka ay ku jirto xogta la bixiyay ee noocaas ah uma baahna inay ku jirto bixinta xogta PHI ee la sameeyay: 1) si loo sameeyo daaweyn, lacag-bixin ama hawlgallo daryeel caafimaad (oo ay ku jiraan la-hawlgalayaasha ganacsiga si waafaqsan heshiiska la-hawlgalayaasha ganacsiga iyo Wakiillada sida uu oggolaaday Qorshaha ama xeerarka asturnaanta sirta ee HIPAA) marka laga reebo sida hoos ku xusan; 2) loo diray shakhsiyaadka wax ku saabsan xogtooda PHI; ama 3) iyadoo la raacayo oggolaanshahaaga; 4) ka hor taariikhda u hoggaansanaanta (Abriil 14, 2006; iyo 5) halki si kale u oggol yahay sharciga iyo dhaqamada asturnaanta sirta ee Qorshaha. Intaa waxaa dheer, Qorshuhu uma baahna inuu tixgeliyo bixinada aan loo kasin qaarkood.

Waxa kale oo aad codsan kartaa oo aad heli kartaa diiwaanka xogta loo bixiyay sababaha lacag-bixinta, daaweynta ama hawlaha daryeelka caafimaadka saddexdii sano ee la soo dhaafay ee xogaha la bixiyay laga soo bilaabo Janaayo 1, 2014 ee diiwaannada caafimaadka elektaroonigga ah ee la helay ka hor Janaayo 1, 2009 ama Janaayo 1, 2011 ee diiwaannada caafimaadka elektaroonigga ah ee la helay Janaayo 1, 2009 ama ka dib.

Haddii diiwaanka xogta la bixiyay aan la bixin karin 60 maalmood gudahood, 30 maalmood oo dheeraad ah ayaa loo oggol yahay haddii qofka la siiyo bayaan qoraal ah oo ku saabsan sababaha dib u dhaca iyo taariikhda la bixin doono diiwaanka xogta la bixiyay.

Haddii aad codsato in ka badan hal diiwaan xogta la bixiyay muddo 12 bilood gudahood ah, Qorshuhu wuxuu ku dallaci doonaa khidmad macquul ah oo ku salaysan kharashka diiwaanka xogta la bixiyay ee xiga.

*Xaqa Helitaanka Nuqul Warqad Ah oo Ogeysiiskan Ah Marka La Codsado*

Si aad u hesho nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah la xiriir sarkaalka asturnaanta xogta:

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo
Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, Minnesota, 55425

Taleefan (952) 854-0795 ama Lambarka Wicitaanka Bilaashka ah (800) 535-6373

*Qoraal Ku Saabsan Wakiillada Shakhsi Ahaaneed*

Waxaad xuquuqdaada ku adeegsan kartaa wakiil shaqsiyeed. Wakiilkaaga shaqsiyeed waxaa laga rabaa inuu keeno caddayn muujinaysa awooddiisa/awooddeeda uu kugu matali karo adiga kahor inta aan qofkaas la siinin fursad uu ku galo xogtaada PHI ama loo oggolaan inuu wax tallaabo ah kuu qaado adiga. Caddaynta awoodda noocaas ah waxay qaadan kartaa mid ka mid ah qaababka soo socda:

- awood qareen oo loogu talagalay ujeeddooyinka daryeelka caafimaadka, oo uu nootaayeeyo sharci-dejiye dadweyne;
- amar maxkamadeed oo qofka loogu magacaabayo inuu qofka u noqdo ilaaliye ama masuul ka noqdo qofka; ama
- qof waalid u ah ilmo aan qaangaarin.

Qorshuhu wuxuu leeyahay awood uu wakiil shaqsiyeed ugu diido helitaanka xogtaada PHI si uu u ilaaliyo dadka nugul ee ugu tiirsan dad kale inay adeegsadaan xuquuqdooda hoos timaada xeerarkan oo laga yaabo inay ku dhacaan xadgudub ama dayacaad. Tani waxay sidoo kale khuseysaa wakiillada shaqsiyeed ee carruurta aan qaangaarin.

## QAYBTA 3
### WAAJIBAADKA QORSHAHA

Sharcigu wuxuu dhigayaa in Qorshahani uu ilaaliyo asturnaanta sirta xogta PHI iyo inuu siiyo shakhsiyaadka (ka qaybgalayaasha iyo ka-faa'iideystayaasha) ogeysiis ku saabsan waajibaadkiisa sharciga ah iyo dhaqamada asturnaanta sirta. Qorshuhu wuxuu ku ogeysiin doonaa haddii ay dhacdo jebsashada la sheegi karo ee xogtaada PHI oo aan ammaan ahayn, sida uu sharcigu farayo. Ogeysiiskaas waxaa ku jiri kara sharraxaad ku saabsan waxa dhacay, macluumaadka ku lugta leh, iyo tallaabooyinka aad qaadi karto si aad naftaada u ilaaliso.

Ogeysiiskan wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo Febraayo 16, 2026, waxaana laga rabaa Qorshuhu inuu u hoggaansamo shuruudaha ogeysiiskan. Si kastaba ha ahaatee, Qorshuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu beddelo dhaqamadiisa asturnaanta sirta iyo inuu isbeddelada ku dabaqo xogta PHI kasta oo uu helay ama uu hayo Qorshuhu ka hor taariikhdaas. Haddii dhaqanka asturnaanta la beddelo, nooc dib loo eegay oo ogeysiiskan ah ayaa qoraal ahaan loo siin doonaa dhammaan ka-qaybgalayaashi hore iyo kuwa hadda jira iyo ka-faa'iideystayaasha ee Qorshuhu weli u hayo xogta PHI.

Nooc kasta oo dib loo eegay oo ogeysiiskan ah waxaa la qaybin doonaa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda dhaqangalka ah ee isbeddel kasta oo ku yimaada adeegsiga iyo bixinta xogta, xuquuqda qofka, waajibaadka Qorshaha ama dhaqamada kale ee asturnaanta sirta ee lagu sheegay ogeysiiskan.

***Heerka Ugu Yar ee Loo Baahan Yahay***

Marka la isticmaalayo ama la bixinayo xogta PHI ama marka xogta PHI laga codsanayo hay'ad kale oo la daboolo, Qorshuhu wuxuu sameyn doonaa dadaallo macquul ah in aanu isticmaalin, bixin ama codsan wax ka badan qaddarka ugu yar ee xogta PHI ee lagama maarmaanka u ah fulinta ujeeddada loogu talagalay isticmaalka, bixinta ama codsiga, iyadoo lagu xisaabtamayo xaddidaadaha dhabta ah iyo kuwa farsamada.
Si kastaba ha ahaatee, heerka ugu yar ee lagama maarmaanka ah laguma dabaqi doono xaaladaha soo socda:

- xog siinta ama codsashada bixiyaha daryeelka caafimaadka ee daaweynta;
- adeegsiyada ama bixinada loo diray qofka;
- xogta loo diro Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka;
- adeegsiga iyo bixinta sharcigu u baahan yahay; iyo
- adeegsiga iyo bixinta loo baahan yahay in loogu hoggaansamo xeerarka sharciga ah ee Qorshaha.

Ogeysiiskan ma khuseeyo macluumaadka waxyaabaha la isku aqoonsado laga reebay. Macluumaadka waxyaabaha la isku aqoonsado laga reebay ma aqoonsanayo qof, sidaas darteedna ma jirto sabab macquul ah oo lagu aamini karo in macluumaadka loo isticmaali karo in lagu aqoonsado qof sidaas darteedna looma tixgeliyo inuu yahay macluumaad caafimaad oo shaqsi ahaan qofka loo aqoonsan karo.
Intaa waxaa dheer, Qorshuhu wuxuu adeegsan karaa ama bixin karaa "soo koobidda macluumaadka caafimaadka" oo ku socda kafaala-qaadaha Qorshaha si uu u helo dalabyo qiimo sare leh ama hagaajinta, wax ka beddelka ama u joojiyo qorshaha caafimaadka kooxda, kaas oo soo koobaya taariikhda sheegashooyinka, kharashyada sheegashooyinka ama nooca sheegashooyinka ay la kulmeen shakhsiyaadka ee uu kafaala-qaade qorshe uu bixiyay dheefo caafimaad oo hoos yimaada qorshaha caafimaadka kooxda; iyo macluumaadka la isku aqoonsado laga tirtiray si waafaqsan HIPAA.

## QAYBTA 4
### XAQA AAD U LEEDAHAY INAAD CABASHO U GUDBISO QORSHAHA AMA XOGHAYAHA HHS

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada asturnaanta sirta la jebiyey, ama aad ka warhesho dhacdo amni oo saamaynaysa xogtaada PHI ama PHI-da ka qaybgalayaasha kale, waxaad u caban kartaa Qorshaha uu gacanta ku hayo sarkaalka asturnaanta sirta:

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo
Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, Minnesota, 55425

Taleefan (952) 854-0795 ama Lambarka Wicitaanka Bilaashka ah (800) 535-6373

Waxaad cabasho u gudbin kartaa Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka, Hubert H. Humphrey Building, 200 Independence Avenue SW, Washington, DC 20201. Qorshuhu kaagama aargoosan doono dacwad aad gudbisay awgeed.

## QAYBTA 5

### CIDDA LAGALA XIRIIRAYO QORSHAHA WIXI MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan ama mowduucyada ku jira, waxaad la xiriiri kartaa sarkaalka asturnaanta sirta:

Qorshaha Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo
Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, Minnesota, 55425
Taleefan (952) 854-0795 ama Lambarka Wicitaanka Bilaashka ah (800) 535-6373

## Gunaanad

Adeegsiga iyo bixinta xogta PHI ee Qorshuhu waxaa nidaamiya sharci federaal ah oo loo yaqaan HIPAA (Xeerka Qaadashada Caymiska Caafimaadka iyo La-xisaabtanka.) Waxaad ka heli kartaa xeerarkan 45 Xeer ee Qawaaniinta Federaalka Qaybaha 160 iyo 164. Ogeysiiskan wuxuu isku dayayaa inuu soo koobo xeerarka. Xeerarku waxay ka saxnaan doonaan kala duwanaansho kasta oo u dhexeeya macluumaadka ku jira ogeysiiskan iyo xeerarka.